

Shaqada ah caddaynta lacagta ee arrinka la xiriira kaarka Moni-kortti wali waa ay socotaa

Shaqada la xiriirta soo celinta lacagta ku hartay kaarka Moni-Kortti wali waa ay socotaa. Sida ugu dhakhsaha badan ayaan idiinku soo wargelinaynaa, marka aan helno warbixinta dheeraadka ah ee arrinkaas ku saabsan. Nasiibdarro Waaxda Socdaalka ma soo celin karto lacagtaas, waayo ma ahan lacag ku jirta mas'uuliyadda Waaxda socdaalka.

Waaxda Socdaalka waxaa ay bishii Luulyo 2020-kii u gudbisay booliska, codsiga ah in ay baaritaan ku sameeyaan hantida ku hartay kaarka Moni-Kortti. Boolisku wuxuu baaritaan ku wadaa howsha la xiriirta hantidaas iyo arrinka ah in uu dhacay dambi ama wax ku saabsan si khalad u isticmaal.

Baaritaanka booliska kasokow, Waaxda Socdaalka si firfircooni leh ayay u waddaa howsha ku saabsan caddaynta arrinkaan, iyo sidii lagu soo celin lahaa dhammaan lacagaha ku haray kaarka Moni-kortti.

Haddii aad tahay macmiil ka tirsan xerada qaxootiga

Xerada qaxootiga ayaa kaala talineysa, sidii aad u codsan laheyd lacagihii kaaga haray kaarka Moni-kortti. Xerada qaxootigu mas'uul kama ahan arrinka ku saabsan lacagaha ku haray kaarka Moni-Kortti, waajibna kuma ahan magdhowga la xiriira arrinkaan.

Haddii aadan aheyn macmiil ka tirsan xerada qaxootiga

Haddii aadan mardambe aheyn macmiil ka tirsan xerada qaxootiga, waxaad kala socotaa hagista la xiriirta lacag soo celinta, qaybta wargelinta ee macaamiisheenna aan ugu talaggalnay, oo cinwaankeedu yahay: [Moni-kortin haltija: Moni-kortilla olevien rahojen palautus](#)

Aad baan uga xunnahay wixii dhibaato ah ee arrinkaan uu keenay.